

Marka ilmahaagu/cunugaagu xanuusado – warbixin ku socota qofka ilamah ka masuulka ah/waalidka

Caruurta yar yari badanaa waay jiran yihiin waana arin iska caadiya oo k mida xaaladaha qoyska in caruurta jiran guriga lagu hayo. Sanadka ugu horeeya noloshooda waxa caruurta ku dhaca isku cel celis ahaan 6-8 infakshanka hawo mareenka ku dhaca sanad kasta. Guud ahaan way ka yaraadaan infakshanka hawo mareenka ku dhaca usbuuc gudahii.

Goorma ayuu ilmuhu/cunugu guriga inuu joogo ay tahay joogaya?

Cunuga xaaladiisa caafimaad ee guud waxay tahay sida cunugu wax u cunaayo, seexanaayo iyo ka qayb qaadashadiisa hawlaha kala duwan ee wadajirka loo qabanaayo, waxaasi oo dhan ayaa qayb ka ah in ilmuhu/cunugu uu joogi karo xanaanada caruurta. Cunugu waa inaanu lahayn xumad/qandho (adiga oo aan soo siinin daawooyinka qandho jabiye ah) iyo inuu ka qayb qaadan karo waxyaalaha kala duwan ee laga sameeyo dibada iyo gudaha ee goobta xanaanadda caruurta si ay u joogaan. Caruurta marmarka qaarkood ayaa firfircoon yihiin guriga laakiin aanay karayn inay ka mid noqdan kooxaha caruurta ah. Cunug yar oo xanuusanaya/jiran waa inuu isdajiya oo uu nastaa oo uu hela wakhti uu kusoo kabto. Shaqaaluhu maaha inay cunuga ka qaadan cabirka xaraaradiisa si ay u go,aamiyaan in cunugu joogi karo xanaanada laakiin qiimaynta waa in lagu sameeya iyadoo la eegyo xaalada guud ee cunuga.

Tilmaamaha la raacayo marka ilmuhu/cunugu guriga joogayo

- Marka cunuga ay qandho hayso.
Maalin marka uu bilaa qandho ahaado ayaa fiicaan inuu xanaanada ku laabto waxa fiicaan in xeerka la raaco.
- Hadii cunugu bilaa qandho yahay laakiin uu daalan yahay oo uu xanuun ku jiro oo aanu ka qayb qaadan karin hawlaha/ciyaaraha xanaanada.
- Marka uu cunugu qabo cudur la is qaadiin karo tusaale ahaan cudur xumad leh oo dhuuntu/cunuhu cunuga xanuunaan iyo dab dhulka/impetigo (waa caabuq maqaarka ku dhaca oo ay keento bakteeriya) aan laga daawaynin ama la siiyay oo u isticmaalaayo antibiyootika mudo ka yar 2 cisho.
- Hadii cunugu leeyahay nabar caabuqay ama cambaar leh nabaro qoyan. Cunugu wuxu ku noqonaya xanaanada caruurta marka nabarku qalaalo oo aanu qoyanayn.
- Calool xanuunka wata mataga iyo shubanka.
Cunugu wuxu ku noqonaya xanaanada caruurta marka uu si caadiya wax u cuno ee aanu matagayn ama uu qabay shuban 48 sacadood. Wakhtiyadda uu ka jiro calool xanuunku goobaha xanaanooyinka caruurta waxa lagu xadidi kara in caruurta jiran walaalahood ay guriga joogaan.

Marka uu mudo dheer socdo wakhtiga infakshanka waxa loo bahan yahay in la joojiyo talooyinka nadaafada. Shaqaalaha xanaanada caruurta ayaa sawir guud oo fiican ka haya xaalada infakshanka ee ka jira xanaanada iyo iyaga oo og caafimadka ilmaha iyo siduu ku yahay goobta. Hadii shaki/kal aragti duwanaa yimaaddo waxa la raacaya qiimaynta shaqaalaha xanaanada caruurta.

Källhänvisning: Västra Götalandsregionen, Hygiensjukskötarska i förskolan,
När ditt barn blir sjukt – information till vårdnadshavare

Waanu helay warbixinta marka uu ilmahaygu/cunugaygu xanuusado

Meesha/magaalada iyo taariikhda

Saxiixa qofka haysta masuuliyada sharci ee ilmaha

Magacaaga oo si fiican u qoran

Ilmaha/cunuga magaciisa

Bogga koowaad idinka ayaa guriga ku haysanaaya iyo bogga 2 waxaad u dhiibaysan marka aad saxiixdaan xanaanada caruurta.

